

Kuraas Kaab (Kuraas Buustar)

Waa maxay kursi kaabku (kursi buustar)?

Kursi kaabku waa kursi baabuur oo aan lahayn xakamayn. Wuxuu kor ugu qaadaa ilmaha si suunka dhexda (dhabta) iyo garabka la mariyo uu si fiican ugu le'egaado. Waxay carruurta kursi kaabka u isticmaalaan marka ay ka koraan kursiga baabuurka laakiin ayna wali gaarin heer ay ku isticmaalaan suunka kursiga dadka qaan-gaarka ah. Suunka kursiga ee aan si fiican u le'egeyn ilmahaaga ayaan ka ilaalin karin waxyeellada haddii u shil dhaco.


Goorma ayuu ilmahaagu diyaar u noqon doonaa kursi kaabka?

Ku hay ilmahaaga kursi baabuur hore-u-jeed ah oo xakamo 5-dhibco leh illaa u ilmuhu gaarayo xadka dhererka iyo xadka sare ee miisaanka loo oggol yahay kursi baabuurkaas (ka fiiri tilmaamaha ay ka bixineyso warshadda soo saartay). Markay ka weynaadaan kursigooda baabuur ee hore-u-jeedka ah, waxa lagu qaadi karaa kursi kaab. Ilmahaagu waa inuu ugu yaraan noqdaa 40 rodol kahor intayna isticmaalin kursi kaabka.

Gobolka Washington gudahiisa, waa sharci in carruurta lagu fadhiisiyo kursi kaab illaa ay ka gaarayaan dherarka 4 fiit iyo 9 inji (57 inji). Carruurta inta ugu badan ayaa u baahan doona kursi kaabka illaa intay gaarayaan 10 ama 12 jir. Carruurta da'doodu ka yar tahay 13 jirka ah waa in lagu qaaado baabuurka kursiga dambe markay suurtagal tahay.

Maxaa noocyo kuraasta buustarka ah ee jira?

- **Kursi kaabka aan qaybta dhabarka lahayn** waxaa loo isticmaali karaa kuraasta dambe ee leh meesha madaxa lagu tiiriyo. Haddii ilmahaagu uuna si fiican ugu tiirsan karin meesha madaxa lagu tiiriyo si loo ilaaliyo madaxooda iyo qoortooda, markaa isticmaal kursi buustar xag-dambe oo sare leh.
- **Buustarka xag-dambe oo sare leh** ayaa loo isticmaali karaa baabuurta leh ama aan lahayn meesha madaxa lagu tiiriyo.



Buustarka aan dhabarka lahayn



Buustarka dhabarka sare leh



Sideen u rakibayaa kursi kaabka?

Labada nooc ee kuraas kaab waa in lala isticmaalo suunka dhabta iyo ka garabka lagu xiro. Marnaba ha isticmaalin mid leh kaliya suunka dhabta lagu xiro. Akhri buugga mulkiilaha gaariga iyo buugga kursi kaabka ka hor inta aadan kursiga gelin. Kuraasta kaabka ah ayaa ka fudud in la rakibo kuraasta gaariga ee kale.

Kuraas kaabka miyaa loogu baahan yahay baabuur u raacidda meesha dhow?

Haa! Hubi inuu ilmahaagu isticmaalo kursi kaabka safar kasta. Taas waxa ka mid ah baabuur dad kale la raaca iyo marka la isticmaalayo adeegga wadaagista raacidda gawaarida. Shilalku waxay ku dhici karaan oo ay ku dhacaan raacidda dhow.

Ogow wax ka sii badan

- 800bucklup.org, 425-828-8975 ama 800-282-5587
- boosterseat.org
- safercar.gov
- seattlechildrens.org
- Daryeel Bixiyaha Ilmahaaga

Seattle Children ayaa macluumaadkan ka dhigi doonta in lagu helo qaab kale marka la weyddiisto. Uga wac Isgaarsiinta Suuqaynta taleefanka 206-987-5323.

Xaashidan ayay dib u eegeen shaqaalaha rug caafimaadeedka Seattle Children. Hase yeeshe, baahida ilmahaaga ayaa mid u gaar ah. Ka hor intaadan ku dhaqaaqin ama aadan isku hallayn macaluumaadkan, fadlan kala hadal daryeel-caafimaad bixiyaha ilmahaaga.

© 2004, 2007, 2010, 2011, 2014, 2016, 2018, 2019 Seattle Children's Hospital, Seattle, Washington. Dhammaan xuquuq dhowran.